

## **Boligaraafiyada hurdada (ballaaran) carruurta ee maalintii iyo u diyaargarooowgeeda**

### **Lasten päiväkaininen unipolygrafia (laaja) ja siihen valmistautuminen - somali**

Boligaraafiyada hurdada waa baaritaan lagu cabbiro neefsashada xilliga hurdada, korontada maskaxda, shaqada muruqyada iyo heerka ogsijiinta dhiigga. Baaritaankan wax xanuun ah ma lahan.

#### **Baaritaanka kahor**

Si loo helo xiriir koronteed wanaagsan, waa in maqaarka madaxa iyo jirka ay ahaadaan kuwa qallalan oo nadiif ah (saliid lama ogola).

Kalkaalisada ayaa mas'uul ka ah ku guulaysashada baaritaanka. Hawsha waalidka/daryeelaha ilmaha waa in ay xil iska saaraan arrinka ku saabsan baahiyaha asaasiga ah iyo daryeelka suurtaggalka ah. Walallaha la dhashay ilmaha baaritaanka lagu samaynaayo, waa in loo diyaariyaa meel lagu xannaaneeyo inta baaritaanku socdo.

#### **Xilliga baaritaanka**

Habeenka baaritaanka kahorreeya si caadi ah ayaa loo seexan karaa. Subaxa baaritaanka ayaa waqtiga lagu heshiiyay lagu imaanayaa qeybta jiifka.

Haddii ay suurtaggal tahay waxaa wanaagsan in ilmaha isagoo soo jeeda oo aan seexan la keeno baaritaanka.

Maqaarka madaxa iyo jirka ayaa waxaa lagu dhejinayaa fiilooyin xiriiriye koronto ah. Waxaa intaas dheer in neefsashada la cabbiraayo, iyadoo qalabka lagu cabbiraayo lagu xiraayo meesha suunka iyo shaarubada. Ogsijiinta dhiigga ku jirta iyo garaaca wadnaha waxaa lagu cabbirayaa aalad sharooto lagula dhejinaayo cagta qaybteeda sare.

Kalkaalisada ayaa la soconeysa qaabka baaritaanku u socdo, haddii loo baahdana iyada ayaa hagaajineysa fiilooyinka korontada ee aan sida fiican u shaqeynayn.

Hurdada maalinta waxaa intii suurtaggal ah la diiwaangelinayaa waqti dheer. Baaritaanka waxaa la joojinayaa xilliga galabnimada, ugu dambeyn saacadda 15.00.

#### **Baaritaanka kaddib**

Jawaabta baaritaanka waxaa kuu sheegaaya dhakhtarka daryeelaaya ilmahaaga. Haddii aadan garanaynin sida aad jawaabta ku heli karto, waxaad jawaabta weydiisaa isbitaalyarihii (poliklinika) ama waaxdii kuu soo dirtay baaritaankaan.



## **Bukaan hage**

2 (2)

HUS Medical Imaging Center  
Clinical Neurophysiology

[www.tutkimukseen.fi](http://www.tutkimukseen.fi)

## **Waxyaabaha kale ee mudan in la ogaado**

Waalidku waxey cuntadooda ku keydsan karaan qolka waalidiinta oo laga helo qaboojiye, cunto-kululeeye (mikro) iyo makiinadda lagu kariyo kafeega iyo biyaha.

Waxaad hore u soo qaadataa kaarka caafimaadka (Kela-kortti) ama kaarka aqoonsigaaga shakhsiyadeed.

Kuuma imaanaayo wax kharash gaar ah oo ku saabsan baaritaanka. Haddii aadan imaan karin, waqtiga iska baaji.

## **Macluumaadyada xiriirka iyo filmaamaha imaanshaha**

### **Uusi lastensairaala, Qeybta KNF**

Stenbäckinkatu 9, D-door, dabaqa 7aad  
Helsinki

Tel. 09 471 80500, isniin-Jimco saacadda  
8.00-15.00

Date of entry: 19.3.2021

Language versions: Lasten päiväaikainen unipolygrafia (laaja) ja siihen valmistautuminen, Avancerad sömnregistrering (polysomnografi) för barn under dagtid och förberedelser inför undersökningen, Newborn daytime Polysomnography (extensive) and how to prepare for it, Проведение полисомнографии (комплексной) у детей в дневное время и подготовка к процедуре, Boligaraafiyada hurdada (ballaaran) carruurta ee maalintii iyo u diyaargaroowgeeda  
Tunniste: 2613